



XAFIISKA XOGAHAYAHA

Go'aan Lr: 1245/2024

Date: 02th August 2024

Go'aan Guddi Fulineed:-

Shir ay isugu yimaadeen Guddida Fulinta Caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay **02 August 2024** shir gudoomiyena ka ahaa Duqa Caasimadda JSL (MD, C/Kariin Axmed Mooge), Kuna saabsanayd Cancell gareen fayl (Tirtirid), Dood iyo falan qayn dheer ka dib.

Wuxuu Go'aansaday:-

Markuu Arkay

:Sharciga Wasaaradda Arrimaha Gudaha Ismaamulka Gobalada iyo Degmooyinka JSL.

Markuu Arkay

:Warqada ku suntan DHH/WHDHG/135/2024 kuna taariikhaysan 25 May 2024 ujeedadeeduna ahayd war-bixin fayl Tr-no:40102, Kana soo baxdey Agaasimaha Waaxda Hanti-Dhawrka Gudaha D.H.H.

Markuu Arkay

:In dhulka Muwaadinka magaciisu yahay Bashiir Saleeban Jaamac **TR:No:40102** kuna yaala Degmada G/Libaax cabirkiisuna yahay 20X24M uu ahaa dhul uu iibsadey balse dib loogu kala noqdey isaga loo celiyey lacagtii uu hore dhulkaas ugu iibsadey.

Markuu Xaqiiqsaday

:Inay lagama maarman tahay in la cancell gareeyo faylka uu la baxay muwaadinka sare ku xusan, Madaama dhulkaas lagu kala noqdey loona celiyey lacagtiisi si ku cad warqada hanti-dhawrka.

Markuu Tixgaliyay

:Tallada masuuliyiinta hawshani khusayso

Gudiga Fulintu:-

Kadib markuu arkay dhamaan asbaabahaasi sare ku xusan Guddida Fulintu wuxuu go'aansaday in la cancell gareeyo (Tirtirid) faylka uu ula baxay Muwaadin (**Bashiir Saleeban Jaamac**) TR numberkiisuna yahay **40102**, Dhulkaas oo ah dhul lagu kala noqdey muwaadinka hore u iibsadey ee sharciyeystena loo celiyey lacagtiisi. Agaasimaha Hanti-Dhawrka & Xafiiska Map-Ka, Waxa laydin farayaa in aad diwaanka juwanada & maapka ka saartaan dhamaan waxa xog ku jirta ee la-tacaluqda faylkaas la cancel-gareeyey eel ahul kala noqdey.

(Siciid Nuur Aw Jaamac) D.H.H.
Xoghayaha Fulinta D/hoose Harg.
Xoghayaha Golaha Deegaanka Harg.

(Khadar Axmed Cumar) (Khadar Nuur)
Ku Xigeenka Duqa Caasimada ahna
Gud/K/Xigeenka Golaha Degan Harg.

(C/kariin Axmed Mooge)
Duqa Caasimada Hargaysa ahna
Gud.Golaha Deegaanka Hargaysa



WAAXDA HANTI DHAWRKA GUDAHA

Ref: DHH/WHDHG/135/2024

Date 25rd May 2024

Ku: - Xoghayha Fulinta D/Hoose

= Xarunta =

Og: - Ku Xigeenka Duqa Casimada

= Xarunta =

Og: - Duqa Caasimada

= Xarunta =

Og: - Geosol

= Xarunta =

Uj: - Warbixin File (Tr (40102)

Mudane xog-haye file-kan waxa ku qoran muwaadinka magaciisu yahay Bashiir Saleebaan Jama, waana file ka dhamaaday System-ka dawlada hoose oo la qaatay loona samaystay mulkiyad. Intaa ka dib mudane xoghaye waxa dhacday in dhulkan uu noqday dhul lagu kala noqday, kaas oo dib loogu celiyey lacagtii uu ku iibsaday dhulkan uu sharciga u samaystay. Waxa kale oo file-ka la socda dhamaan nootaayooyinkii lagu hashiiyey in lagu kala noqday dhulkaas cabirkiisu yahay (20m x20m).

Sidaas darteed mudane xog-haye waxa uu hada uu bahan yahay in loo sameeyo go'aan guddi fulineed oo ah in la TirTiro Mulkiyadaa dhamaatay ee Tr-keeda sare ku soo xusay.

Allaa Mahad Leh

Abdillaahi Mahdi Jamac

Agg. Waaxda Hanti Dhawrka Gudaha



Hargeisa/Somaliland Mobile: +252 63 4185752 / +252 63 4734739

Jamhuuriyada Soomaaliland
Municipality



Jamhuuriyada Soomaaliland
Dawlada Hoose Ee Hargaysa

Date 31st Dec 2023

Ref: DHH/WHDHG/ 691 /2023

Ku: - Xoghayha Fulinta D/Hoose

Og: - Duqa Caasimada

Og: - Ku Xigeenka Duqa Casimada

Uj: - Warbixin File (No (48267)

Mudane Maayer waxa aan halkan kula wadaagayaa Totalka kharashka ku Baxay Tr-ki la cancel- garaynayey (Tr No (40102). Waana kan hoos ku qoran kharashkii kaga baxay muwaadinkan magaciisu ahaa Bashiir Saleebaan Jama.

Doller	Cash-ka
\$1970.11	428,258

To: A. K.
Fadlan Filen.
Copy 5000
Lawir Juwano
Cashuuta cison
uq qadbiyo
Xafiiska
Xisabada
Allaa Mahad Leh
3-03-2024

Abdillaahi Mahdi Jarnac
Agg. Waaxda Hanti Dhawrka Gudaha

Hargeisa/Somaliland Mobile: +252 63 4185752 / +252 63 4734739

To: A. maxmudke
fadlan haloo
celiyo la ceptas
uusoo cadeeyay
Hanti dhawrka
uun soo process
jaree Totalka
Cashka uyo dollarka



Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Cadaalada JSL

Republic of Somaliland
Somaliland Ministry of Justice

Xafiiska Nootaayada Sharciga Ah Ee KIBAAR Ee Hargaysa

NootaayadaKIBAAR@gmail.com
REF/IGDH/HAR/22001/2023

Tell:-0634129820/063063392909.

Taar:-23/07/2023

Ujeedo: Heshiis iib/Hul lagu kala Noqday

Maanta Oo Ay Taariikhdu Tahay Ta Sare Kuxusan Waxaa Xafiiska Nootaayada Sharciga Ah Ee KIBAAR Hortiisa Lagu Galay Heshiis Laba Dhianac:

1. Dhinaca 1aad iibiye : Hodan Aadan Samatar
2. Dhinaca 2aad: iibsade Bashiir Saleebaan Jaamac

Qodobada Heshiiskuna Waa Sidan.

Qodobka 1aad) Anigoo ah libiyaha Hodan Aadan Samatar Waxaan Halkan ku Cadaynaa in aan Dhinaca 2aad Ku kala noqonay dhulkii aanu hore u kala iibsanay . Dhulkaas oo aan ka siiyey LACAG DHAN \$28,000 (Sideed iyo labaatan kun oo Dolar) Waxa kale oo halkan ku Cadaynayaa in Dhulkan aan hore qayb uga iibiyay Bashiir,islamarkaana aanu ku kala noqonay iibkaas Sidaas Ayaan Sexeexay anigoo Raali ku ah.

Sexeexa iibiyaha: Hodan Aadan Samatar _____ 063-3748317

3. Hadaan Ahay iibsadaha Bashiir Saleebaan Jaamac waxaan Halkan ku Cadaynayaa inaa Aqbalay ka noqoshada Dhulka Cabirkiisu Dhan yahay 20Mx24 kuna yaala Dagmada Gacan Libaax Waxaana Dhulkaas Siistay Lacag Dhan \$28,000 (Sideed iyo labaatan kun oo Dolar),lacag taydiina aan dib u qatay Sidaas Ayaan Sexeexay Aniga oo Raali ku ah.

Sexeexa iibsadaha: Bashiir Saleebaan Jaamac _____ 063-7097445

Maatiyada

1. C/risaaq Dhamac Caabi :-  063 4426241
2. C/rashiid Maxamuud Cali :-  063-4484512

Qodobka 4aad) Sarkaalka Xafiiska Nootaayada Kibaar Waxa Uu Cadaynayaa In Heshiiskan Hortiisa Lagu lagu laka noqday Sidaasna Uu Dhaqan Gal Kuyahay Heshiiskani

Maxamed SH.Cismaan Sh. Xasan
Sarkaalka Nootaayada Sharciga Ah Ee KIBAAR:-

